

Kaalmadee ayaan ku siin karnaa?

Hey'adda Madaxbannaani Ku Noolaanta howlaheeda waa lacag la'aan waxaana lagu habeeyey baahidaada.

- Waxaan ku siin doonnaa akhbaar khibrad leh ee ku saabsan xuquuqaha iyo hababka kuu furun
- Waan kula shaqeyn doonnaa si aan u cayimno baahidaada si aan kuu siinno caawinaadda aad rabto si aad ugu noolaato habka aad rabto
- Waxaan kuu heli doonnaa macaashyada iyo hawlaha aad xaq u leedahay
- haddii ay jiraan caqabad waxa aad rabto ama u baahan tahay hor taagan, waan kula shaqeyn doonnaa si aan u helno xal

Caawinaadda Isbitaalka ka dib

Caawin bilaash ah waxaa lagu bixiyaa si ku meelgaar ah si lagu caawiyo marka isbitaalka lagaa soo saaro. Waxaan ku siin karnaa caawinaad (aan ahayn xannaano shakhsi) todoba maalin usbuucii ilaa afar usbuuc, ay ku jirto diyaarin raashin fudud, nadiifin aasaasi, caawin dib-ula-qabsi caawin GP iyo booqasho isbitaal ee socota.

Oo keli ah inaan ku dhaho 'mahad weyn' howshaada. Hadda waxaan awoodaa inaan gurigeyga ku negaado.

Mr H, West Derby

Dadka da'da ah, Kaalmo habboon iyo daboolid baahidooda ayaa dadka ka caawin kara in ay Ku negadaan madaxbannaani iyo in ay ku raaxeystaan in ay guryahooda ku noolaadaan sida ugu badan ee macquulka ah. Qasdigeennu wuxuu yahay inaan soo bandhigno caawinaad ku habboon si dadka da'da ah ay ugu noolaadaan noloshooda sida ay u rabaan. Macmiisha waa ay dooran karaan kaalmada ay u baahan yihiin si ay u maamulaan noloshooda.

Hey'adda Age Concern Liverpool

Hey'adda Age Concern ee Liverpool waa hey'ad gargaar ee la shqeysa dadka da'da ah ee Liverpool. Qasdigeennu waa in aan wanaajinno tayada nolosha ee dadka da'dooda tahay 50 iyo ka weyn ee Liverpool iyo hubin in ku darid sanooyin nolosha micnaheedu yahay ku darid nolosha sanooyin!

Mahad waxaa leh kooxda wanaagsan ee tabaruca ah iyo shaqaalaha iyo kaalmada dhaqaale aan ka helno Guddiga Degmada Liverpool iyo hey'adda (Primary Care Trust), waxaan awoodnaa inaan kaalmeyno dadka da'da ah ee Liverpool.

Ma dooneysaa inaad caawinto?


Arrin ay Hey'adda Madaxbannaani- Ku-Noolaanta ay ku faanto waa kaalmada iyo rabitaanka shaqaalaha tabaruca ee ka badan 400 kuwaasoo saacadaha waqtigooda huray usbuuc walba si ay u caawiyaan dadka da'da ah in ay ku noolaadaan madaxbannaani.

Haddii aad firaqo usbuuc walba, aadna rabto inaan wanaajiso bulshadaada waxaan jeclaan lahayn inaan ku maqalno. Oo keli soo wac kooxda deegaankaada si aad u hesho akhbaar dheeri ah.

AGE Liverpool
Concern



Delivered by **AGE** Liverpool
Concern



Ka caawin dadka da'da ah in ay maareeyaan noloshooda



Liverpool **NHS**
Primary Care Trust

Hey'adda Madaxbannaani ku Noolaanta

Hey'adda ka fekerka da'da Liverpool waxay leedahay khibrad ballaaran ee soo bandhigga howl tayo leh si dadka da'da ah looga caawiyo in ay ku noolaadaa cimri dheer iyo caafimaad iyo nolol madaxbannaan.

Hey'adda Madaxbannaani-Ku-Noolaanta waxay soo bandhigtaa kaalmo kala duwan si loo xaqiijiyo baahi cayiman ee dadka da'da ah sida dukaameysiga, badbaadada guriga ama u guuridda guri ku habboon kaalmada bulshada sida caawin inaad qoyska la xariirto iyo asxaabta ama aad dibadda u baxdo. Waxaan kaloo ka caawinnaa dadka xuquuqda macaashyada iyo la socodka howlaha kale ay ku jirto caafimaadka, raaxeysiga iyo kulammada bulshada. Akhbaarta waa lacag la'aan si loo xaqiijiyo in dadka da'da ah ay doorooshiyo in u sameeyaan noloshoodana ay u maamulaan.

Waxaan xaqiqsaday inaan ahayn kiis muhiim ah laakin waxaan dareemaayaa in aan ahay sidaa – waxaad ii sameyso waxaad u sameyn doontaa qof walba

Mrs B, Allerton



Hey'adda Madaxbannaani-Ku-Noolaanshaha waxay tayo u yeeshaa noloshada dadka da'da ah iyadoo si guud u abbaareysa in ay daboosho baahidooda cayiman si sharaftooda ay u dhawraan, qanaacaddooda maskaxeed ee madaxbannaani ku noolaanshaha.

Hey'adda Madaxbannaani-Ku-Noolaanshaha waa mid caawinta dadka waxaana maalgeliya Guddiga Degmada iyo Hey'adda Xannaanada ee Primary Care Trust. Howlaha waxaa gudbiya Hey'adda Age Concern ee Liverpool.

Yaa ka macaashaaya?

Si aad u hesho howsha Hey'adda Madaxbannaani –Ku-Noolaanshaha waa in da'daadu tahay 50 ama ka weyn, aadna ku nooshahay xuduudda Degmada Liverpool aadna keligaa nooshahay ama uu ku daryeelo qof aan awood badan lahayn ama isaguba khatar ku jiro.

Howshu waa lacg la'aan mana laha waqti go'an ee uu qofku ka faa'ideysanaayo howsheenna.

Ujeeddadeennu wa in dadka da'da ah ay is-maamulaan

Hey'adda Madaxbannaani-Ku-Noolaanshaha waxaa maamula koox shaqaale ee mushahar la siiyo iyo kuwo tabaruc ku shaqeeya kuwaasoo ay aamineen kumaan-kun dad ee da' ah ee ku nool Liverpool. Waxaan dadka u qabannaa howsha baahidooda dabooli karta. Arrintaa si joogta ah ayaa dib-u-fiirin loogu sameeyaa si loo hubiyo in dadku ay ku noolaadaan sida ay u rabaan noloshooda oo ay jecel yihiin.

Howsha la qabto mar walba waa mid tixgelin iyo caawin ku dheehan. Aad ayey u wanaagsan tahay in la ogaado caawin dheerad ah in la heli karo haddii loo baahdo.

Mrs L, Anfield

La xariir...

Sida loola xariiro Hey'adda Madaxbannaani- ku – Noolaanshaha

Haddii aad tahay qof da' ah ama aad taqaan qof da' ah ee ka macaashi kara caawinaadda Hey'adda Madaxbannaani – Ku-Noolaanshaha, fadlan na soo ogeysii. Oo keli ah waa hal taleefan ee aad noo soo dirto annagaa markaa sii tixraaci doonna. Soo wac kooxdeenna deegaanka taleefanka:

**North Liverpool Office:
0151 256 7350**

**Central Liverpool Office:
0151 330 5592**

**South Liverpool Office:
0151 733 7732**

Taleefannada waxay furan yihiin 9am-4pm Isniin ilaa Jimce.

Ahkbaaraad dheeri ah ee ku saabsan Hey'adda Madaxbannaani –Ku-Noolaanshaha, fadlan la xariir Maareeyaha He'yadda taleefanka:

0151 3305631 ama email:
ils.manager@ageconcernliverpool.org.uk

Waxaan dhawreynaa inaan ku maqalno!